

Farriin ka socoto Guddiga Ammaanada – Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta

Ujeeddo: Weerarka Intarneedka ee Change Healthcare

Waxaa laga yaabaa in aad maqashay in Change Healthcare, oo xubin ka ah UnitedHealth Group (UnitedHealth), ay dhawaan la kulantay weerar dhanka intarneedka ah. Change Healthcare waxay maareysaa ilaa 1/3 ka mid ah dhammaan diiwaanada dadka bukaanka ee Maraykanka, oo ilaa maanta UnitedHealth waxay tilmaantay in aanay si gaar ah u aqoonsan karin wax qof ah oo macluumaadkiisa la jabsaday. Sidan oo kale, ilaa 1/3 oo ka mid ah dhammaan dadka Maraykanka ah ayaa laga yaabaa in ay leeyihii xogta caafimaadka ee la ilaaliyo (PHI) ama xogta shakhsii ahaan shakhsiga lagu aqoonsan karo (PII) oo uu waxyeeleeyay weerarka.

Sanduuqu si toos ah heshiis ugulama jiro Change Care Health. Si kastaba ha ahaatee, qaar badan oo ka mid ah bixiyayaasha caafimaadka ee ay isticmaalaan ka-qaybgalayaasha iyo qoysaskooda ayaa la shaqeeya Change Care Health si ay u socodsiiyaan sheegashooyinka caafimaadka. Sidaa darteed, waa suurtogal, oo, dhab ahaantii, waxay u badan tahay in sheegashooyinka ku lug leh ka qaybgalayaasha iyo dadka ku tiirsan ay gaareen jabsashadan.

Maadaama baaxadda lixaadka leh ee saameynta suurtagalka ah ee weerarka, iyo in kasta oo Sanduuqu aanu haynin wax macluumaad ah oo aan ka ahayn waxa UnitedHealth ay ka dhigtay kuwo furan oo si guud loo heli karo, Guddiga Ammaanada waxay rabeen in ay kula socodsiiyaan in UnitedHealth ay hadda bixinayso la socodka kaarka amaahda iyo ilaalinta xatooyada aqoonsiga oo **bilaasha** ah muddo labo sano ah oo ay siinayso qof kasta oo ka walaacsan in laga yaabo in ay saameeyeen weerarka intarneedka. Shaksxiyaadka ayaa iska diiwaangelin kara la socodka kaarka amaahda iyo ilaalinta xatooyada aqoonsiga iyagoo wacaya xarunta wicitaanka ee heeganka ah lambarka **1-866-262-5342**.

Xarunta wicitaanku ma awoodi doonto in ay bixiso xog gaar ah oo ku saabsan xogtaada. Si kastaba ha ahaatee, UnitedHealth waxay sidoo kale samaysay degel u gaar ah barta <http://changecybersupport.com> oo aad booqan karto si aad u hesho macluumaad guud oo ku saabsan waxyaabihi ka soo kordhay ee la xiriira weerarka intarneedka. Fadlan si toos ah ula xiriir UnitedHealth haddii aad qabto wax su'aalo ah.

Mar labaad, Sanduuqu ma hayo macluumaad gaar ah oo ku saabsan sheegashooyinka iyo macluumaadka ku lug lahaa weerarkan intarneedka. Waqtii xaadirkan, waxay la socodsiinayaan dhammaan ka-qaybgalayaasha inay ogaadaan la socodka kaarka amaahda ee bilaashka ah ee ay heli karaan kuwa raba in ay raacaan xalkan.

Xafiiska Sanduuqa ma hayo macluumaad dheeraad ah wakhtigan mana awoodi doono inuu ka jawaabo wixi su'aala ah ee laga yaabo in aad ka qabtid xaaladdan. Taa beddelkeeda, fadlan wixi ah su'aalo, walaacyo, iyo weydiimo ku hagaaji Change Healthcare lambarka **1-866-262-5342** .